

Seattle Department of Transportation
BAAHIN DEG-DEGGA AH

Xiriir: Ethan Bergerson, sdot.media@seattle.gov, 206-684-3151

Maqaayadaha iyo tafaariiqda halgamaya xilliga cudurka baahsan, shaqaalaha caafimaad ee la waco, faananka iyo basaska waxey hadda codsan karaan maritaanka buundada hoose

Codsiga waa in la guddoomaa ka hor 15ka May si loo maro 1-da Juun

SEATTLE—Dad badan iyo ganacsiyo oo deggan Galbeedka Seattle waxey hadda awoodaan iney codsadaan maritaanka si ay ugu dul wadaan (buundada hoose) ee Spoken St. Swing Bridge). Buundada hoose waa la adkeeyey si loogu firaqeeyo baabuurta emerjensiga inta Buundada Galbeedka Seattle dhismahu ku socdo.

Dadku waa iney codsadaan, keenaan leysinka taargadooda, la kulmaan baahida u qalimdda, ayna u oggolaataa Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) ka hor isticmaalka buundada hoose.

Kooxahan isticmaalayaasha waxey hadda codsan karaan maridda si ay ugu dul wadaan buundada hoose:

- Shaqaalaha caafimaad ee la Waco (kaliya u socdaalaya kana imanaya shaqo loo soo wacay; caddeyn loo shaqeeyaha ayaa loo baahan yahay)
- Maqaayadaha fadhigooda yahay Galbeedka Seattle iyo ganacsatada tafaariiqda (ku kooban socdaallada deg-degta ah si ay usoo qaataan qalab ama badeeco)
- Baabuurta la wada raaco (faananka, basaska ama baabuurta la wadaago ee leh leysinka taargo wada raacidda ee gobolku bixiyo; Kuwani kuma jiraan Uber iyo Lyft)
- Dadka u safraya ama ka soo noqonaya daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo (oggolaansho dhaqtaarkaaga ayaa loo baahan yahay) sii marista Galbeedka Seattle; waxa ka mida u wadashada daaweyn la sii marayo Feeriga Faunleroy.

Codsiga maritaanka buundada hoose wuxuu ku diyaar yahay

www.seattle.gov/transportation/lowbridge iyo luqadahan soo socda: Ingiriis, Isbaanish, Kuuriyaan, Soomaali, Shiinees (soo jireen), Fiitnaamiis, Oromo, iyo Khamer. Haddaad gacan uga baahan tahay buuxinta codsiga ama aad qabto su'aalo, waxad wici kartaa ood farriin cod ah ku dhaafi kartaa 206) 400-7511 ama u iimeel garee WestSeattleBridge@seattle.gov. Fadlan keen magacaada, meel lagaala soo xiriiro iyo luqadda aad u baahan tahay ka dibna qof ayaa dib kuu soo wici doona.

Cadsiga waxa la socodsiiyaa bishii mar. Codsiyada waa in la helaa ka hor 15-ka bisha si laguu siiyo marin una bilowdo 1-da ee bisha xigta. Maritaanka ma bilaabanayo durba marka aad hesho xaqijinta sababtoo ah warbixinta leysinka taargada waa la in geliyaa nidaamka xoojinta sawir-qaadista.

Maritaanka buundada hoose la ballaariyey waa mid ku saleysan ku meel gaar ah oo xadidan. SDOT waxey adkeyn kartaa ama la noqon kartaa mar kasta iyadoo hore kuugu soo sheegeysa

haddii ay dhaceyso. SDOT waxey ka yareyn ama joojin kartaa maritaanka buundada hoose kooxo badan aakhirka 2021 inta Qeybta 5aad ee Dekedda Seattle aaney dib u furmin si buundadu awood ugu hesho baabuurta xamuulka.

Siyaasadda maritaanka buundada hoose

Buundada hoose waxa lagu soo xadidday baabuur gaar ah iyo sawir xoojin maalmaha toddobaadka 5-ta subax ilaa 9-ka fiidkii iyo maalmaha dhamaadka toddobaadka 8-da subax ilaa 9-ka fiidkii. Baabuurta aan loo oggoleyn waxey heli doonaan 75 doolar socod kasta ay ku maraan buundada hoose xilliyada saacadaha la adkeeyey.

Mudnaanta SDOT ee buundada hoose waa in marin lagu kalsoon yahay loo helo baabuurta emerjensiga, xamuulka, iyo basaska muddada Buundada Sare-Kacsan dayac-tirka lagu hayo. Dadka wada noocyada baabuurtaasi waxey isticmaali karaan buundada dhammaan saacadaha ee maalintii mana u baahna iney codsadaan marin ay u helaan ama iney u keenaan SDOT leysinka taargada. Buundada sare-kacsan waxa la filayaa in dib loo furo 2022.

Warbixin dheeraad ah, ay ku jiraan liiska buuxa ee baabuurta u qalmi kara maritaanka, waxey diyaar ku yihiin webseydka mashruuca buundada hoose www.seattle.gov/transportation/lowbridge.

###